



**COLUMBUS
CITY SCHOOLS**

Mission. Each student is highly educated, prepared for leadership and service, and empowered for success as a citizen in a global community.

Office of Teaching and Learning Division of Early Childhood Education

3700 South High Street

Columbus, OH 43207

Ph. 614.365.5822

Fax 614.365.5163

3-da Janaayo, 2024

Qoysaska qaaliga ah,

Sannad Cusub oo Farxad leh! Waxaan rabaa in aan kaaga mahadceliyo inaad noo ogolaatay inaan u adeegno adiga iyo ardaygaaga inta lagu jiro sannad-dugsiyeedkan. Shaqaalaha Qaybta Waxbarashada Carruurnimada Hore waxay u shaqaynayaan si hagar la'aan ah si ay u hubiyaan inaad haysatid macluumaadka lagama maarmaanka ah si ay u caawiyaan adiga iyo ardaygaaga markay u gudbayaan xannaanada (kindergarten-ka) sannad-dugsiyeedka 2024-2025.

Fadlan eeg macluumaadka ku lifaaqan si ay kaaga caawiyaan diyaarinta inta uu ardaygu qaadayo tillaabooyinka xiga ee socdaalkiisa/keeda waxbarasho. Fadlan la hadal macalinka ardaygaaga haddii aad wax su'aalo ah ama walaac ah ka qabtid xanaanada (kindergarten-ka).

Si daacad ah,

Dr. Terra A Baker
Agaasimaha Waxbarashada Carruurnimada Hore



**Office of Teaching and Learning
Division of Early Childhood Education**

Central Enrollment Center
430 Cleveland Avenue
Columbus, OH 43215
Ph. 614.365.5822
Fax 614.365.8749

Mission: Each student is highly educated, prepared for leadership and service, and empowered for success as a citizen in a global community.

Ikhtiyaarada Diiwaan-gelinta ee CCS Ardayda fasallada Ka hor Barbaarinta (Pre-K) oo u gudbaya Dugsiga Xanaanada (Kindergarten)

Haddii ilmahaagu hadda dhigto Dugsiga ka hor Barbaarinta (Pre-K):

UMA baahnid inaad dib isga-diiwaan-geliso Dugsiga Barbaarinta (Kindergarten). Dhammaan ardayda waxaa si toos ah loogu qori doonaa **dugsigooda ciwaanka Guriga** ee Barbaarinta (Kindergarten-ka). Tan waxaa ku jira ardayda hadda ka diiwaan-gashan dugsiga bakhtiyaa-nasiibka ah. **Dugsiga gurigaagu** wuxuu ku salaysan yahay ciwaanka xaafadda gurigaaga. Haddii aad guurtay inta lagu guda jiray sannad-dugsiyeedka, fadlan hubi inaad cusboonaysiisay ciwaanka adiga oo adeegsanaya Cusbooneysiita Sannadlaha ah ee dhanka Xiriirka Waalidkaaga (Parent Portal). Haddii aadan hubin dugsigaaga guriga waxaad ka heli kartaa goobta dugsiga degmada Magaalada Columbus ee goobeeyaha ah halkan: <https://www.ccsok.us/Page/6288>.

Haddii ilmahaagu hadda dhigto Dugsiga Barbaarinta (Pre-K) oo aad rabto inay dhigtaan dugsi aan ahayn dugsigooda guriga ciwaan ahaan:

Waxaad ku buuxin kartaa arjiga bakhtiyaa-nasiibka ee dugsi kale oo KA DUWAN iyada oo loo marayo Xarunta Xiriirka Waalidka ee (Infinite Campus Parent Portal). Codsiyada waxaa lagu buuxin karaa onlaynka inta lagu guda jiro xilliga codsiga bakhtiyaa-nasiibka (1-da Febraayo - ilaa 29-ka Maarso, 2024).

Haddii aad u baahan tahay furaha/kooda gelitaanka si aad u samaysato Koontada Xiriirka Waalidka (Parent Portal account), waxaad ugu diri kartaa aqoonsi sawir leh (picture ID) iyo magaca ilmahaaga iyo taariikhda dhalashada bogga ah parentportalaccess@columbus.k12.oh.us.



COLUMBUS
CITY SCHOOLS

Xafiiska Waxbarashada iyo Barbaarinta **Qaybta Waxbarashada Carruurnimada Hore**

TAARIKHAHA IS-DIIWAAN-GELIN 2024

Qoysasku waa inay buuxiyaan [Diiwaan-gelinta Khadka tooska ah Online Registration](#) ee 2024-2025 si ay u bilaabaan habraaca diiwaan-gelinta halkii ay ka samaysan lahaayeen ballanta si qofahaan uga diiwaan-geliyaan xarunta Diiwaan-gelinta Dhexe.

3-da janaayo, 2024 Diiwaan-gelinta khadka tooska ah waxay U-furantahay fasallada K-ila 12-aad

1-da Febraayo - ilaa 29-ka Maarso Codsiyada Bakhtiyaa-nasiibka Dugsiga Hoose
Waxaa laga ogolaaday Xarunta Xiriirka

13-ka Febraayo Carwada/Bandhigga Dugsiga Hoose
Xogg dheeraad ah ka eeg bogga CCS

Balamaha Diiwaangelinta Xanaanada (Kindergarten-ka) LOOMA baahna

Ballamaha diiwaangelinta HADDA KADIB LOOMA BAAHNA, laakiin waxaa loo heli karaa ikhtiyaar ahaan qoysaska doonaya caawinta.

Diiwaan-gelinta Latchkey ka hubi barta internet-ka ee Waxbarashada Carruurnimada Hore ee hoos timaada "Barnaamijka Latchkey" <https://www.ccsok.us/Latchkey>

Kala xiriir FACTline 614-221-3228 ama FACTLine@columbus.k12.oh.us

Revised 1/2024



**Office of Teaching and Learning
Division of Early Childhood Education**

430 Cleveland Avenue
Columbus, OH 43215
Ph. 614.365.5822
Fax 614.365.8749

Mission: Each student is highly educated, prepared for leadership and service, and empowered for success as a citizen in a global community.

Xanaanada (Kindergarten-ka) Xogta Talaalka

Dugsiga xanaanada (Kindergarten-ka) ayaa geeska nagu soo haya! Sharciga Ohio wuxuu farayaa dhammaan ardayda inay qaataan ugu yaraan tallaalka hoos ku qoran si ay dugsiga u galaan. Haddii ardaygaagu uu ka diiwaan-gashan yahay dugsiga barbaarinta CCS ee (preschool) oo uu u baahan yahay tallaalo cusub waxaad heli doontaa gudbin tallaalka dabayaaqada gu'ga. Waxaa kale oo aad ka eegi kartaa diiwaankoodii ugu dambeeyay ee tallaalka marka loo eego shaxda hoose.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay caawimaad si aad u hesho daryeel caafimaad, fadlan kala xiriir kalkaalisada ECE ee ECENURSES@columbus.k12.oh.us ama fakis ugu dir diiwaanka tallaalka la cusboonaysiiyey 614-365-8745.

TALLAALADA	TALLAALADA IMAANSHAHA DUGSIGA
DTaP/DT Tdap/Td gawracatada, Teetanada, iyo xiiq-dheerta	Fasallada K-ilaa 12-aad: Afar (4) ama in ka badan oo ah DTap ama DT, ama isku darka kasta. Haddii dhammaan afarta kuuro/irbadood la qaatay ka hor dhalashadii 4-aad, kuurada/irbadda shanaad (5) ayaa loo baahan yahay. Haddii kuurada/irbadda afraad la qaatay ugu yaraan lix bilood ka dib kuurada/irbadda saddexaad, iyo maalinta dhalashada 4-aad ama ka dib, kuuradaas/irbadaas shanaad (5) looma baahna. Fasallada 7-aad- ilaa12-aad: Hal (1) ah kuurada/irbadda tallaalka ah Tdap waa in la qaataa maalinta dhalashada 10-aad ama ka dib.
Dabaysha (POLIO)	Fasallada K-ilaa 12-aad: Saddex (3) ama ka badan oo IPV ah. Kuurada/irbadda kama dambaysta ah waa in la qaataa maalinta dhalashada 4-aad ama ka dib iyada oo aan loo eegin tirada kuurooyinkii/irbadihii hore. Kaliya saddex-geesoodka ah trivalent OPV (tOPV) ayaa ku xisaabtama shuruudaha tallaalka Mareykanka. Kuurooyinka/Irbadaha OPV ee la bixiyay ka hor 4/1/16 waa in la xisaabiyaa (Haddii aan si gaar ah loo xusin sida loo qaatay inta lagu jiray ololaha) iyo kuurooyinka/irbadaha ka dib 4/1/16 waa in aan la xisaabin.
MMR-KA	Fasallada K-ilaa 12-aad: Labada (2) kuuro/irbadood oo ah MMR. Kuurada/Irbadda kowaad (1) waa in la qaataa maalinta kowaad ama ka dib. Kuurada/Irbadda labaad waa in la qaataa ugu yaraan 28 maalmood ka dib kuurada/irbadda koowaad (1). *Si loo tiriyo, MMR iyo Bus-buska (Varicella) waa in la qaataa isku maalin ama ugu yaraan 28 maalmood gudahood, iyada oo aan lahayn waqti ogolaansho dhaafsan intaas.
Cagaarshowga B (HEP B Hepatitis B)	Fasallada K-ilaa 12-aad: Saddex (3) kuuro/irbadood oo ah Cagaarshowga B (Hepatitis B). Kuurada/Irbadda labaad waa in la qaataa ugu yaraan 28 maalmood ka dib kuurada/irbadda koowaad. Kuurada/Irbadda saddexaad waa in la qaataa ugu yaraan 16 toddobaad ka dib kuurada/irbadda koowaad iyo ugu yaraan 8 toddobaad ka dib kuurada/irbadda labaad. Kuurada/Irbadda ugu dambaysa ee taxanaha ah (kuurada/irbadda saddexaad ama afraad), waa in aan la qaadan ka hor da'da 24 toddobaad.
Varicella Bus-buska) (Chickenpox)	Fasallada K-ilaa 12-aad: Laba (2) kuuro/irbadood ee tallaalka Bus-buska (varicella) waa in la qaataa ka hor inta aan dugsiga la galin. Kuurada/Irbadda kowaad (1) waa in la qaataa maalinta koowaad ama ka dib. Kuurada/Irbadda labaad waa in la qaataa ugu yaraan saddex (3) bilood ka dib marka la qaato tan koowaad (1); si kastaba ha ahaatee, haddii kuurada/irbadda labaad la qaato ugu yaraan 28 maalmood ka dib kuurada/irbadda koowaad, waxaa loo arkaa mid sax ah.
Qoor-gooyaha (MCV4 Meningococcal)	Grade 7: Hal (1) kuuro/irbadd oo ah tallaalka Qoor-gooyaha (Meningococcal) (tallaalka 4-ta kooxood ee caabuqa /serogroup A, C, W iyo Y) waa in la qaataa ka hor inta aan dugsiga la galin, maalinta dhalashada 10-aad ama kadib. Grade 12: Labo (2) kuuro/irbadood oo MCV4 ah. Qaadashada Kuurada/Irbadda labaad ee da'da 16 sano ama ka dib, oo leh ugu yaraan siddeed toddobaad oo ah inta u dhaxaysa qaadashada kuurooyinka/Irbadaha. Haddii kuurada/irbadda 1-aad la qaatay maalinta dhalashada 16-aad ama ka dib, kuurada/irbadda 2-aad looma baahna.

Tixraac (Reference): <http://www.odh.ohio.gov> – Eeg Tallaalada. Haddii tallaalka aan la siin waqtiyo ku haboon, waxaa laga yaabaa in loo baahdo kuurooyin/irbado dheeri ah si loo buuxiyo shuruudaha. Muddada la ogolyahay ee 4-ta maalmood ah waxay khusaysaa da' kasta iyo inta u dhaxaysa ugu yaraan marka laga reebo 28-maalmood inta u-dhexeeya.